

Macluumaad ku saabsan gudniinka

Information om könsstymning




Waxaad macluumaadkan u helaysaa taageero ahaan, si aad gabadhaada uga ilaalisoo gudniinka dumarka.

Den här informationen får du som ett stöd för att skydda din dotter mot kvinnlig könsstymning.

Waa maxay gudniin, maxaase ka dhalan kara oo cawaaqib ah?

Vad är könsstymning och vad får det för konsekvenser?




Gudniin wuxuu ka dhiganyahay in la dhaawaco gabadha ama haveeneyda hoosteeda. Tusaale ahaan in la googooyo.

Gudniinku siyaabo badan ayuu u dhaawici karaa gabadha ama haveeneyda.

Könsstymning betyder att skada en flickas eller kvinnas underliv. Ett exempel är att skära i det.

Könsstymning kan skada flickan eller kvinnan på flera sätt.



Waxaa marka la gudayo ka bixi kara dhiig fara badan. Waxaa sidoo kale jirta khatar xagga infekshinka ah.

Waxaa iman karta xaalad aad halis u ah oo keeni karta in ay gabadha ama haveeneydu dhimato.

Det kan komma mycket blod vid könsstymningen. Det finns också risk för infektion.

Det kan bli så allvarligt att flickan eller kvinnan dör.



Waa caadi inay gofka ku soo dhacaan fikrado dhib badan oo la dareemo murugo iyo niyadjab.

Det är vanligt att få jobbiga tankar och känna sig ledsen och nedstämd.



Xanuun ayaa laga dareemi karaa hoosta.


Waxaa adkaan karta in la kaadiyo.

Waxaa lagu dhibtoon karaa caadada.

Det kan göra ont i underlivet.

Det kan vara svårt att kissa.

Det kan bli problem att ha mens.



Xanuun ayaa lagu dareemi karaa galmada.

Waxaa adkaan karta in la uureysto.

Waxaa adkaan karta in carruur la dhalo.

Det kan göra ont att ha sex.

Det kan vara svårt att bli gravid.

Det kan bli problem att föda barn.


Gudniinku waa ka mamnuuc Iswiidhan

Könsstympning är förbjudet i Sverige



Gudniinku waa ka macnuuc Iswiidhan sida uu sharcigu qabo. Qofki sameeya waxaa lagu xukumi karaa ilaa iyo 10 sano oo xabsi ah.

Könsstympning är förbjudet i Sverige enligt lag. Den som gör det kan få upp till 10 års fängelse.



Sidoo kale waa mamnuuc in la sameeyo isku day xagga gudniinka ah. Qofna qof kale uma sheegi karo inuu taa sameeyo. Qofki ogaada inuu qof kale sameynayo gudniin, waa inuu taa sheegaa.

Det är också förbjudet att göra ett försök till könsstympning. Ingen får säga åt någon annan att göra det. Den som vet att någon annan kommer att utföra en könsstympning måste berätta det.



Waa mamnuuc in waddan kale la aado oo gudniin lagu soo sameeyo halkaas.

Det är förbjudet att åka till ett annat land och utföra könsstympning där.



Waalidka ayaa mas'uul ka ah in ay hubiyaan in cidna aysan gabdhahooda ku sameyn gudniin.

Vårdnadshavare är ansvariga att se till att ingen utför könsstympning på deras dotter.


Yaad la xiriiri kartaa si aad caawimaad u hesho?

Vem kan du kontakta för hjälp?




Ma ka baqeysaa in adiga ama qof aad garaneysid lagu sameeyo gudniin? Waxaad markaas la hadli kartaa Hey'adda Adeegga Bulshada, qeybta heeganka ee Hey'adda Adeegga Bulshada ama booliiska meesha aad deggantahay.

Är du rädd för att du eller någon du känner ska bli utsatt för könsstämpning? Då kan du prata med socialtjänsten, socialjouren eller polisen där du bor.



Nambarrada taleefanka ee Hey'adda Adeegga Bulshada iyo qeybta heeganka ee Hey'adda Adeegga Bulshada waxaad ka heleysaa barta intarnetka ee degmadaada. Waxaad sidoo kale wici kartaa 112 si aad ula xiriirto qeybta heeganka ee Hey'adda Adeegga Bulshada. Marka aad wactameysid, ma u baahnid inaad sheegto qofka aad tahay.

Socialtjänsten och socialjourens nummer finns på kommunens webb. Du kan också ringa 112. Du behöver inte säga vem du är.



Haddii aad rabto inaad booliiska wacdo, waxaad waceysaa 114 14. Haddii aad joogto waddanka dibaddiisa, waxaad waceysaa +46 77 114 14 00. Haddii ay jirto xaalad adag oo degdeg ah, waxaad waceysaa 112.

Om du vill ringa till polisen ringer du 114 14.
Om du är utomlands ringer du +46 77 114 14 00.
Om det är akut ringer du 112.



Haddii aad joogto waddanka dibaddiisa oo aad u baahan tahay in lagaa caawiyo inaad u soo laabato Iswiidhan, waxaad la xiriiri kartaa safaaradda Iswiidhan ee meesha aad joogto. Macluumaadka xiriirku wuxuu ku jiraa barta intarnetka ee swedenabroad.se.

Om du är utomlands och behöver hjälp att åka tillbaka till Sverige kan du kontakta svenska ambassaden där du är. Kontaktuppgifter finns på hemsidan swedenabroad.se.



Waxaad sidoo kale, qeybta heeganka ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda, ka wici kartaa +46 8 405 50 05. Mar walba way furan tahay.

Du kan också ringa till UD-jouren: +46 8 405 50 05. Det är alltid öppet.